DAWLADA PUNTLAND EE SOOMALIYEED

WASARADDA QORSHAYNTA IYO ISKAASHIGA CAALAMIGAA

SIYAASADA

ISKU DUBARIDKA GARGAARKA

Sebtembar 2016

Contents

ERAYGA WASIIRKA ..... **IV**

ERAY BIXIN ..... **V**

CUTUBKA 1: **1**

AASAASKA 1

1.1 Hordhac 1

1.2. Sababayn 2

1.3. Himiladda 3

1.4. habka hawlgalinta mashaaricda horumarineed. 4

1.5. Mabaadi'da la raacayo 5

1.6. Dabaqaada iyo xadadnaanta. 6

1.7. Dhibaatooyinka diirada la saaray. 6

1.8. Awood kooban 6

1.9. Isbarbaryaac la xiriira macaamilka deeq bixiyayaasha. 7

1.10. Kharashka badan oo ku baxa fulinta mashaariicda 7

1.11. Lahaansha gargaarka iyo doorka hogaaminta dawladda oo hooseeya. 8

1.12. Sadaalin la'aanta gargaarka. 8

1.13. Xogta dhaqdhaqaaqa hawlaha gargaarka 8

CUTUBKA 2: **10**

SIYASADAHA 10

2.1. Xuquuqda go'aanka diidimo gargaar. 10

2.2. Lahaanshaha hantidada gargaarka. 10

2.3. Is Wafajinta mashaarciida iyo Mudnaanta Dowladda. 11

2.4. Mideeynta hawlgaladda gargaarka. 12

2.5. Horumarinta awoodda. 13

2.6. Gargaar la saadalin karo. 14
2.7. Iskaashiga. 14
2.8. Nooc Gargaarka la doorbidayo. 15
2.9. Qiimaynta iyo Dabagalka. 16
2.10. Nidaamka Maareynta Macluumaadka Gargaarka.....16
CUTUBKA 3: 17
DHAQAN GALINTA SIYASADA IYO NIDAAMKA ISKU DUBARIDKA.....17
3.1. Nidaamka isku dubaridka.....17
3.2. Hirgalinta siyaasadan iyo caqabadaha la filayo. 18
3.3. Masuuliyada Wasaraddaha.....19
Xigasho 21

ERAYGA WASIIRKA

Kadib markaan aragnay muhiimada ay leedahay in Dawladda Puntland ay jihayso hay'adaha caalamiga, kuwa qaramada midoobay iyo deeq bixiyayaasha ayaan samaynay siyaasada Gargaarka Puntland taas oo ku hagidoonta ahdaafta Puntland ee ah horumar waara iyo yaraynta faqriga.

Siyaasadan waxay daaha kaqaadaysaa muhiimadda uu gargaarku u leeyahay horumarka Puntland, caqabadaha kahor imaankara iyo siyaasadaha iyo istiraatijiyadaha looga gudbikaro. Waxay aqoonsantahay baahida loo qabo dawladda Puntland inay horumariso nidaamyadeeda iyo qaabdhismeedyadeeda si loo wanaagsan oo la isugu dubarido deeqaha yimaada Puntland. Waxay kaloo soo jeedinaysaa in si wadajir ah ay uwada shaqeeyaan Dawladda Puntland iyo hay'adaha caawiya.

Hadafka ugu wayn ee sjyaasadan waa in deeqaha yimaada Puntland ay taageeraan ahdaafta Puntland iyo qorshaha 5ta sano ee Puntland iyo ahdaafta horumarineed ee caalamka.

Ugu danbayntii, siyaasadan waxa hadafkeedu yahay in lahubiyo in gargaarku noqdo mid micno leh oo waafaqsan himilooyinka horumarineed ee Puntland; ayna noqoto mid hagta dawladda, hay'adaha, ururada bulshada iyo daneeyayaasha kale ee ay qusayso arintan.

Shire Xaaji Faarax

Wasiirka Qorshaynta iyo Xiriirka Caalamiga ah

Dawladda Puntland ee Soomaaliya

ERAY BIXIN

“Iswaafajin” waa in hay’adaha horumarinta iyo deeq bixiyeyaashuba raacan mudnaanta iyo qorshaha dawladda. Iswaafajin run ah waxaa la gaari karaa marka mashaariicda dibada ka timaada iyo qorshayaasha dawladdu ay leeyhiin ujeedo iyo istratijiyad mid taas oo keenaysa waxqabad miro dhal ah.

“Ururada bulshada rayadka ah” micmnaheedu waa ururrada aan dawliga iyo faa’iido doonka midna ahayn kuwaasoo qabta shaqooyin aad u badan oo ay kamid yihiin horumarka, arimaha bulshada iyo gargaarka. Waxaana kamid ah qaybaha bulshada, ururada aan dawliga ahayn, midawga shaqalaha, ururada haweenka, samo falayaasha, xirfadlayaasha iyo kuwa xaquuqda u dooda. Qeexitankan masoo galayaan ururada sida gaarkaa loo leeyahay iyo kuwa amniga ka shqeeya.

“Xogkeydiye lagu maamulayo Gargaarka” macnaheedu waa xogkeydiye toos ah oo loo isticmalo macluumaadka mashruuca gargaarka iyo bixinta deeqaha la siiyo Puntland. Dowladda Wuxuu u ogolaanaya in ay si toos ah ula socoto habsami u socodka gargaarka iyo sidii miisaniyadda loogu dari lahaa dhaqalaha macawinada lagu helo. Habkan xogta macaawinada lagu maaraynayo waxay kale oo dawladda ka kalmaynaysaa wadashaqaynta deeq bixiyayaasha gar ahaan xog isdhaafsiga.

“Gargaar biniadantinimo” waa caawin waqti gaban oo loogu talo galay in lagu bad baadiyo naf ama lagu yareeyo dhibaato nolooleed ayadoo la difaacayo sharafta qofka inta lagu guda jiro mashruuca iyo kadiba. Gargaarka biniadanimo waa tan ilaalisa mabadiida caalamiga ah sida adaminimo, dhexdhexaadnimo, Exasho la’aan iyo madaxbanaani. Waxaa gargaarka biniadanimo kamid ah. u diyar garawga iyo ka hortaga masiibooyinka, bixinta waxyabaha daruuriyaadka ah sida hooyga, cuntada, biyaha,

nadaafada, caafimaadka iyo wax yaabaha kale ee lagu caawinayo nolosha dadka si ay ugu soo noqdaan nolosha caadiga ah.

“Isku Duwida Deeqaha” Larry Minear wuxuu ku qeexay isku dubaridka deeqaha ee hanaanka UN ka in uu yahay hab is daba jooga oo lagu fulinayo siyasadaha gargaarka bini-adantinimada si ku haboon oo sax ah in looga faa’iidaysto. Ayadoo la raacayo qodobadan (1) in qorshe mudo fog ah la dajiyo (2) in xog lasoo uruuriyo lana mareeyo (3) in la isku dubo rido maalka iyo moodka lagu gaari karo ujeedada loona mamulo si hufan (4) kala qoondaynta hawlaha shaqo ee goobta laga hawlgalayo (5) maamulka iyo madaxda dawladda jirta oo lagu la heshiiyo hab wada shaqayneed oo miro dhal ah (6) in lala yimaado hogaamin u hawl gasha si dareen iyo dhug leh oo anshax ku dheehan yahay taas oo isla markaas aan xanimayn waxqabadka loo baahan yahay.

" Horumarinta rasmiga ah ee Gargaarka" waa dhaqaalaha rasmiga ah ee looga goleeyahay kobcinta dhaqaalaha iyo daryeelka dalalka soo koraya taas oo ujeedku yahay in loo caawiyo dalalkaas, iyadoo dhaqalahaas ugu yaaran 25% ka mid ah tahay deeq. Haddiisa maalgalintaas ay dayn la socoto waa in qaymo dhismi 10% loo sameeyo qaymaha dheef korka ee dulsaarta ku ah daynta. Sida laysku raacsan yaha Gargaarka horumarinta rasmiga wuxuu ka kooban yahay kaalmo ay deeq bixiyayaashu siiyan dalalka soo koraya(labo daraf) ama kaalmo dalalka soo koraya ka helaan ha’yadaha aduunku wada leeyahay sid Baanka Aduunka iyo wixii la mid ah. Qeexitanka waxaan ku jirin daymaha iyo dhaqaalaha kale ee loola jeedo in lagu xayeeso ama dibada loogu suuq geeyo wax soo saar am badeeco la dhoofiyo.

CUTUBKA 1:

AASAASKA

1.1 Hordhac

Ilaa iyo xiligii ay bur burtay dawladii dhexe ee Somalia uuna soo if baxay dagaalkii sokeeye, Somalia ama khaasatan Puntland waxay ka mid ahayd dalalka sida weyn ugu tiirsan deeqaha caalamka. Dawlada Puntland waxaa ka go'an in ay uga faaiidaysato macaawinada iyo deeqaha dibada ka yimaada sida ugu haboon deeqaha ay hada hesho iyo kuwa ay rajaynayso mustaqbalkaba. Si loo kobciyo tayada iyo wax tarka gargaarka dalka soo gala.

Dawladda Puntland waxay tiigsanaysa in ay dabaqdo heshiisyadda iyo baaqyadda caalamiga ah ee lagu beegsanayo in kor loogu qaado waxtarka gargaarka sida Habka cusub ee macaawinooyinka ee lagu saxiixay Busan2011(new deal) iyadoo waafajinaysa daruufaha u gaarka ah. Dawlada Puntland ayaa horay ugu tilaabsatay isbadal la taaban karo marka la eego dhismaha haygalka dawladnimo, nabadeynta iyo ka soo kabashada wajiga xaaladda degdegga ah aydoo hada u talaabsatay heerka horumarinta.

Wasaradda qorsheyntu markay aragtay baahida loo qabo hanaan isku dubarida gargaarka oo kor looagu qaado waxtarka gargaarka, waxay diyaarisay siyaasada isku dubaridka gargaarka taas oo looga goleeyahay in ay hagto hawlaha gargaarka laga fulinayo Puntland si loo hubiyo in mashaaricda gargaarku qayb ka noqdaan dadaalada horumarineed ee bulshada iyo Dawladda Puntland horumuud ka yihiin isla markaasna looga

fogaado in hal mashruuc lagu soo celceliyo ama hal meel mashaariicidu isku nooc ah looga fuliyo.

Siyaasadan waxaa diirada lagu sarayaa in lagu xaliyo dulduleelooyinak la xariira maraynta gargaarka sida abuurista dareen lahaansho ee hantida gargaarka lagu helo, xoojinta hogaaminta dawladda ee maraynta macaawinooyinka, kobcinta awooda dawladda, iskaashiga iyo iswaafajinta mudnaanta baahiya iyo mashaaricda dalka laga hergalinayo. Siyaasada gargaarka ee Puntland waxay dheeganaysa hababka maraynta wanaagsan ee khibrad ahaan loogu tijaabiyey dalalka aan isku daruufha nahay, waxay kale oo ka duulaysa daruufaha iyo baahiya gaarka u ah Puntland.

Siyasadan waxaa lagu diyariyay hab wada tashi ku salaysan oo ay ka qaybgaleen khuburo iyo hawl wadeeno kala duwan oo aragtidooda iyo talooyin ba ka dhiibtay kuwaas oo ka kala socday wasarado iyo wakaalado kala duwan.

1.2. Sababayn

Curinta siyasada isku dubaridka gargaarka waxay ku salaysan tahay qodobka 54 ee dastuurka Puntland oo u idmaday golaha fulinta ee dawladda Puntland in ay diyaariyaan islamarkaasna fuliyaan siyasadaha iyo qorshayaasha dhaqale ee horumarinta dalka. Siyaasadan waxaa looga gol leeyhay in ay fududayso fulinta qorshaha labaad ee horumarinta shanta sano. Kaasoo ay ku qoondaysan tahay ujeedoyinka iyo siyasadaha horumarineed ee Puntland kaas oo ah miradhalkii dodo iyo wada tasho dhexmaray Dawlada, ururada calamiga ah ee aan dawliga ahayn, kuwa sida gaarka ah loo leeyahay iyo ururada bulshada. Siyasadan waxay kale oo ka shidaal qaadanaysa heshiisyada caalamiga sida :- a) Heshiiska

Habka cusub ee lagu kaalmeeyo dawladaha tabarta daran ee ka dhacay Busan 2011b).Baaqa Paris ee ku saabsan kor u qaadida waxtarka gargaarka (2005) c) Ajandaha Accra (2008).

1.3. Himiladda

Waaxda isuduwidda gargaarka ee WQIC wuxuu fududaynayaa iskaashiga u dhexeeya dawladda Puntland iyo hay'adaha horumarinta ayadoo la tix galinayo mudnaanta baahiyaha kala duwan , iyo in la yareeyo wax yaabaha keenaya hoos u dhac ku yimaado gargaarka si looga faaiidaysto dhaqaalaha gargar ahaan ku yimaada Puntland isla markaasna loo gaaro higsashada dawladdu ee aragtida fog oo ah isku tashi iyo isku filnaan oo looga kaaftoomo ku tiirsananta gargaar dibadeed. Si loo xaqiijiyo himilooyinka kor lagu xusay waxna looga qabto faqriga loona dardargaliyo kobaca dhaqaale waxaa loo baahday in la helo siyaasado cad cad iyo tilmaamo ay kuwada shaqeeyaan dhamaan uruurada iyo hawl wadeenada ka shaqeeyanaya horumarka dalka.

warqada siyasadan waxaay leedahay labo ujeedo oo waaweyn. Kuwaasoo kala ah

a) In kor loogu qaado tayada iyo waxtarka hawlaha gargaarka ee laga fuliyo Puntland iyadoo mar walba mudnaanta la siinayo hogaaminta Dawladda si dareenka lahaansha loo abuuro.
b) In la abuuro jawi dhiirigalin kara kororka gargaarka ay Puntland ugu baahan tahay horumarkeeda iyadoo la tayeeynayo hanaanka isla xisaabtanka iyo hufnaanta ee maamulka mashaariicd horumarineed ee dawladda dhexdeeda iyo ha'yadaha caalamiga ee ku hawlan arimaha gargaarka.

Dawladda Somalia oo ay Puntlandna Xubin ka tahay iyo deeq bixiyayaasha gargaarka waxay ka wada tirsan yihiin saxiixayaasha baaqa caalimiga ee Paris ee ku saabsan tayeeynta waxtarka gargaarka.

Baaqa Paris wuxuu ku waajabinayaa saxiixayaasha in ay la yimaadan siyaasado iyo istratijado kor loogu qaadayo waxtarka gargaarku u leeyahay dalalka macawinooyinka ku tiirsan. Sidaas awgeed baaqas iyo heshiisyada caalimga ee nuxur ahaan la mid ah waxay gundhig u yihiin habka dawladdu u qeexday tayeynta gargaarka.

1.4. habka hawlgalinta mashaaricda horumarineed.

Waxaa jira xiriir toos ah oo ka dhexeeya istaratijadaha dhimista faqriga, dajinta miisaniyada iyo qorshayaasha qaybaha kala duwan dawladda.Sidaas daradeed waa in hawlgalinta gargaarku xoojiso nidaamka dalka iyo ha'yadaha halbowlaha u ah oo ay ka mid yihiin kuwa hoos ku xusan.

a. In la tayeeyo maaraynta maamulka guud ee maaliyada lagana dhigo mid lagu kalsoonan karo iyadoo la xoojinayo habka wax iibsiga dawladda iyo nidaamka warbixinada
b. .Iswaafajinta gargaarka iyo qorshayaasha qaranka oo ay ka mid tahay in dhamaan mashaaricda gargaarka ay waafaqsan yihiin qorshayaasha dawladda islamarkaasna loo soo gudbiyo warbixinada la xiriira si loogu daro miisaniyadda.
c. Kobcinta awooda dawladda iyo bulshadda iyadoo laga caawinayo xaga farsamda taas oo marwalba ku salaysan mudnaanta dawladda.
d. In la Isticmaalo nidaamka dalka waana intii surtagal ah hawlgalada gargaarka la marsiiyo nidaamka dalka sida isticmaalka nidaamka

iibsiga guud ee dawladda iyo nidaamyada la midka ah ee dawladdu leedahay.

1.5. Mabaadi'da la raacayo

Mabaadiida hoos ku xusan ayaa hagaya abaabulka iyo hawlgalinta gargaarka.

a. Dawladdu waxay u hawl galaysa kordhinta gargaarka ay dibada ka hesho si aan waxyeelayn madaxbanaanida iyo haykalka dawliga ah.
b. Dowladda Puntland ayaa hoggaaminaysa hannaanka horumarinta ayadoo iskaashi la leh daneeyayaasha caalamiga ah si loo xaqiijiyo in Dawladdu yeelato masuuliyadda hawlgalinta mashaariicda horumarinta iyo fulintooda.
c. Barnaamijyada gargaarka waa in ay la jaan qaadaan mudnaanta horumarinta dawladda sida ku cad siyaasadaha horumarinta dowladda ee ku qeexan qorshaha labaad ee horumarinta shanta sano iyo qorshayasha qaybaha kala duwan ee dawladda.
d. Gargaar kasta oo dalka imaanaya waa in uu ahaada mid xoojinaya awooda dawladda isla markaasna fududayaynaya adeega bulshada loo qabanayo
e. Hantida lagu soo aruursho magaca Puntland waa in loo isticmaalo si masuuliyad ku dheehan tahay si taas loo gaaro Dawladda Puntland iyo deeq-bixiyayaasha waxaa xil kasaaran yahay in si wada jira loo abuuro hab isla xisaabtan oo dhinacyadda oo dhan qancin Kara isla markaasna xaqiijinaya in gargaarka looga faa’iidaysto sida ugu haboon.
f. Hawl fulinta mashaaricda gargaarka iyo kormeerkeedaba intii surtagal ah waa in la marsiiyo hanaanka dawliga ah iyadoo

mudnaanta la siinayo hay'daha dawliga in ay mashaariicda fuliyaan lana isticmaalo hanaanka iyo qab dhismeedkooda.

1.6. Dabaqaada iyo xadadnaanta.

Siyaasada gargaarka Puntland waxaa lagu dabaqayaa dhamaan deeq-bixiyeyaasha iyo hay'daha horumarinta ka shaqaynaya Puntland iyo sidoo kale dhammaan hay'adaha dawladda ee heerarka kala duwan . Dowladda waxay aqoonsan tahay in ay kaalin muhiim ah ka ciyaaraan hay'daha horumarinta kala shaqeeya ee aan dawliga ahayn ee Puntland, kor u qaadida xuquuqda ,dhiirigalinta muwadaniintu in ay hawlaha bulshada ka qayb qaatan, kormeerka wax-qabadka Xukuumadda iyo adeeg-bixinta oo lagula xisaabtamo. Iyadoo laga duulayo xaqiiqada ah in hay'daha horumarintu qabtaan shaqooyin badan waxaa muhiim ah in hawlaha gargaarka ay fulinayaan lala madaaneeyo mudnaanta qorshayaasha dawladda si kor loogu qaado waxtarka gargaarka loona yareeyo isbarbaryaac iyo kala daadsanaan ama in hal meel mashaaric isku nooc ah laga fuliyo.

1.7. Dhibaatooyinka diirada la saaray.

Inkastoo wada hadal iyo dadaal joogto ah ee dhinaca isku xirka gargaarka ay sameeyaan labada dhinac ee dowladda iyo hay'adaha caalamiga ah, hadana wali waxaa jira dhibaatooyin waxyeelayn kara waxtarka gargaarka isla markaasna caqabad ku noqon kara himiladda dawladdu ku doonayso in ay soo jiidato gargaar dheeraad ah sida doorka hogaaminta dawladda, awooda fulinta oo xadiidan iyo saraynta qarashka ku baxa macaawinadda.

1.8. Awood kooban.

Dawladda Puntland waxaa haysta dhibaatooyin la xariira awooda fulinta sida in aysan shaqaalaysiin Karin shaqaale xirfad sare leh taas oo samayn

ku yeelata wada xajoodka dawladdu la gasho deeq bixiyayaash iyo waliba kartida dawladdu ku fuliso mashaaricda horumarineed.

1.9. Isbarbaryaac la xiriira macaamilka deeq bixiyayaasha.

Isbarbaryaac ay keenta midnimo la'aan sida loola macaamilo deeq bixiyayaasha waxay marar badan sababta habacsanaan iyadoo wasaraduhu mid walba iskeed ula macaamisho deeq bixiyeyaasha taas oo hoos u dhigta doorka hogaamineed ee wasarada qorsheynta iyo xiriirka caalamiga ah Isbarbaaryaac hay'adaha dawladda wuxuu kale oo wiiqa awooda dawladdu u leedahay in ay danaheeda difaacdo marka deeq bixiyayaasha lala xajoonayo madama cod mideeysan iyo qaab mideeysan aan lagu wajahin.

1.10. Kharashka badan oo ku baxa fulinta mashaariicda

Sida dalalka kale ee macaawinada ku tiirsan ba ay la wadaagto, gargaarka Puntland soo gaara waxaa ku baxa kharash faro badan kaas oo yareeya qaymaha runta ah ee mashruuco ku fadhiyo. Inkasta oo ay adagtahay in lacag ahaan loo badalo qaymaha ku dhuma fulinta mashruuciida hadana waxaa cad in mashaariicda qaymahay lagu fuliyo aad u badan tahay.

Dawladda waqti badan ayaa uga dhuma shirarka dibada ay kula yeeshan deeq bixyayaasha iyo diyaarinta warbixinada la xariirta mashariicda taas oo ay sabab u tahay in hawl wadeenada hay'adaha ee jooga dalka gudahiisa aysan lahayn awood go'aan qaadasho, taasna waxay culuys ku kordhisaa awooda dawladda oo markii horeba koobnayd.

1.11. Lahaansha gargaarka iyo doorka hogaaminta dawladda oo hooseeya.

Kaalmada gargaarka ayaa ku timaada gudaha Puntland qaab mashaariic oo aan isku xirnaan ayadoo ay deeq-bixiyayaashu leeyihiin hagida ayna fuliyaan hay'ado aan dawli ahayn. Dawladdu waxay ku leedahay saameyn yar xaga samaynta iyo maaraynta mashaariicda gargaarka. Maqnaanshaha hoggaanka dowladda ee maamulka gargaarka ayaa keenay cawaaqib xun oo ay ka mid yihiin waxtar kooban oo ku saabsan ka-faa'iideysashada mashaariicada lagu talo galay taas oo ragaadisay dowladdnimadda isla markaasna wiiqda kalsoonida dadweynuhu ku qaban dawladda.

1.12. Sadaalin la’aanta gargaarka.

Gargaarka Puntlnad yimaada mahaan mid la saadalin karo goortu imaanayo. Waxaa marar badan dhacda in mashaariicdu dib uga dhacaan xiligii la fulin lahaa taas oo wax u dhinta waxtarka mashriicda isla markaasna adkaysa qorsheynta iyo ku talogalkooda gar ahaana adeegyadda loo fidin lahaa dadka tabalaysan ee ku tiirsan gar gaarka.

1.13. Xogta dhaqdhaqaaqa hawlaha gargaarka

warbixinada aan dhamaystirnayn oo ay bixiyaan qaar ka mid ah ururada aan dawliga ahayn ayaa hoos u digaysa hufnaanta, caqabadna ku noqonaysa awoodda dowladda in ay la socoto ama maamusho gargaarka la helo. Xogta dhaqdhaqaaqa gargaarku waxay muhiim u tahay qorsheynta iyo sidii loogu dari lahaa miisaniyadda dawladda.. Way adag tahay in la helo sawir buuxa ee taageerada dibada laga helo, ayadoo qaar ka mid ah ururadu ay diidan ama aanay awoodi karin in ay dawladda

siiyaan war bixinada iyo xogta la xiriirta hawlaha iyo hantida gargaarka ku baxda ama u qorsheysan.

Dhinaca kale, waxaa cad in meelaha qaarkood ay dhacda in dawladdu si aan nidaamsanayn u raadiso xogta la xiriirta hawlaha gar gaarka iyadoo wasaaradaha iyo hay'adaha fulintuba ay hay’daha ka qaatan macluumaadka, ka dibna aysan la wadaagaan macluumaadka hay’adaha kale ee dawladda.

CUTUBKA 2:

SIYASADAHA

2.1. Xuquuqda go’aanka diidimo gargaar.

Dowladda Puntland waxay xaq u leedahay in ay diido qaybo ka mid ah gargaarka haddii wax yeelada gargaarku ka badan tahay faa'iidooyinka laga helayo ama uu san waafaqsanayn mudnaanta dowladda ee ku salaysan baahiyaha ama sharuudo xad-dhaaf ah lagu xiro helitaanka gargaarkaas.

2.2. Lahaanshaha hantidada gargaarka.

Sida ka muuqata Baaqa Paris iyo heshiisyada kale ee caalamiga ah ee ku saabsan waxtarka gargaarka waxaa lagama marmaan ah in gargaarku noqdo mid wax tar u leh wadanka ka faa'iideysanaya. Waxaa lagama marmaan ah in wadanka gargaarka la siinayo uu ku qanco faa’iidooyinka isla markaasna uu yeesho dareenka lahaansha hantida gargaarka .Hadaba si loo abuuro dareenkaa lahaansha, dowladda Puntland ayaa qaadanaysa kaalin hoggaamineed ee maamulida gargaarka. Dowladda Puntland ayaa sii wadi doonata in ay dejiso ujeeddooyinka iyo kala mudnaysiinta qorshayaasha horumarinta dalka, ayadoo leh isuduwidda iyo jihaynta hantidada gargaarka. Ugu dambayntiina, deeqaha horumarineed waa hanta loo hibeeyey dadka iyo dawladda Puntland oo ay waajib ku tahay in ay xaqiijiyaan waxtarka deeqaha horumarinta ee loo hibeeyey.

Wasaarad ama hay'ad kasta waxaa loo baahan yahay in loo sameeyo qorshe ku habboon tallaabooyinka maalgashi si waafaqsan qorshaha labaad ee horumarinta shanta sano ee Puntland, ayadoo la sameeynayo dib

u habayn ku haboon mashaariicda lasoo jeediyey in loo baahan yahay sida ku cad qorshayaasha maalgashiga guud ee la qoondeeyey.

Wasaaraddaha ama hay'adaha dawladdu waxay u bandhigiyaan mashruuca mudnaanta u leh hadba deeq bixiya ka tageeraya. Haddiisa ay jirto cid dhexe oo la fulinaya mashruuca sida (Qaramada Midoobay, ururada caalamiga ah, hay'ada maxaliga ah iyo shirkadaha sida gaarka loo leeyahay) . Cidda fulinaysa mashruuca waxaa waajib ku ah in ay xaqiijiyo ka-qaybgalinta bulshada ka faa'iideysaynays mashruuca iyo doorka hogaaminta ee wasaaradda ay wada shaqayntu kala dhexayso inta uu mashruuca socdo.

Si kasta ha ahaate, mashruuc kasta yoolkiisa kama dambaysta waa in uu xoojiyo awooda bulshada iyo hoggaanminta dowladda.

2.3. Is Wafajinta mashaarciida iyo Mudnaanta Dowladda.

Daraasadka laga sameeyeya macaawinooyinka iyo habka loo fuliyo, waxaa lagu ogaaday in gargaarka fulintiisa lala baalmaro hanaanka dawliga ah ay wiiqdo awooda dawladda iyo hay'adaha qaranka isla markaasna ay daciifiso kartida iyo adkaysiga bulshadu u leedahay masiibooyinka iyo dhibaatooyinka ka dhasha. Sidaas awgeed Dawladda Puntland waxay ku boorinaysa dhamaan hay'adaha ku lug leh arimaha horumarinta in ay fulint mashaariicda u isticmaalan hay'daha dawladda taas oo looga gol leeyahay xoojinta hogaaminta dawladda iyo kartida bulshadu u leedahay in ay u diyaar garowdo masiibooyinka dhici kara mustaqbalka.

Qorshaha horumarinta shanta sano ayaa tilmaamaya sida ay dawladu u kala hor marisay baahiyaha mudada dhexe, waana in ay dabaqaan dhamaan ku hawlanayaasha horumarinta. Dawladdu waxay raacsan tahay in dajinta qorshayaasha la isticmaalo qaabka muujinaya natiijada si loo gaaro higsiga horumarinta ee dalka. Wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee dowladda waxay leeyihiin qorshayaal iyo xog kaydsan oo ay xigan karaan deeq bixiyayaash iyo hay'adaha kale marka ay diyaarinayaan mashaariicda.

Dowladda Puntland waxay ku boorinaysa deeq-bixiyeyaasha in ay iswaafajiyaan hawlgalinta gargaarka iyo mudnaanta taas oo ku tilmaaman qorshaha horumarinta labaad ee shan sano. Dawladdu sidoo kale waxay ka dalbanaysa deeq-bixiyeyaasha inay dawladda la wadaagan macluumaadka gargaarka si loogu daro miisaaniyadda qaranka.Dowladda Puntland waxay ku dhiirigalinaysaa dhamaan hay'daha la-wadaagga horumarinta in ay isticmaalaan nidaamka dalka intii suurtagal ah. Dowladda waxaa ka go'an in ay iskaashi la samayso hay'daha la fuliya horumarinta si loo hagaajiyo qaab dhismeedka dawladda iyo in wax laga qabto dhaliilaha laga tabanayo hay'adaha Dowliga. Dawladdu waxay kala shaqaynaysa deeq- bixiyaasha in la hirgaliyo hab lagu maamulo xogta macaawinada si kor loogu qaado hufnaanta iyo isla xisaabtanka u dhaxeeya dawladda iyo deeq-bixiyayaashaba.

2.4. Mideeynta hawlgaladda gargaarka.

Tiro badan oo mashaariic gargaar ah oo an isku xirnayn waxay abuuri karaan kharashaad aan loo baahnayn iyo mashaariic isku mid ah oo hal meel laga wada fuliyo. Dawladdu waxay rajaynaysaa in hay'daha la wadaagga horumarinta in ay hagaajiyaan gaarsiinta gargaarka ayadoo loo

marayso hab wadajir ah meel kasta oo suurtagal ah iyadoo hay'ad walba meeshay ku fiican tahay looga faa'iidaysanayo lana kala duwayo hawlaha cid walba qabanayso taas oo yaraynaysa kharashka ku baxa isbarbaryaac.Dawladdu waxay xoojin doontaa hab xiriinaya iskuna duba ridaya hawlaha gargaarka .

Dowladda ayaa sidoo kale ku dhiiri galinaysa dhamaan bah-wadaagta horumarinta in la daago war bixinada si wada jir ahna loo tax-liiliyo isla markaasna loona wada dajiyo , qorshaynta istaraatiijiga ah . Dowladda Puntland waxay horkaci doontaa kormeerada wada jirka ay samaynayaan wafuuda deeq bixiyayaasha iyo wakiilada hada dawladda taas oo looga goleeyahay in la kormeero mashaaricda socota ama loo kuur galo baahiya bulshda si loogu dabaqo mashaariicda mustaqbalka.

Dawlada Puntland waxay si firfircoon kala qayb qaadan doontaa deeq bixiyayaasha in la daraasadeeyo dhibaatooyinka ay tahay in diirada la saaro iyo sida loo xalin karo. Tani waxa ay yaraynaysaa kharashka siyaadada ee ku baxa fulinta mashariicda Puntland sidoo kale wada shaqaynta oo la hagaajiyo waxay fursad siinaysa dhamaan daneeyayaasha oo dhan in ay ka qayb qaataan isbedelka loo baahan yahay iyo hirgalinta maamul wanaaga.

2.5. Horumarinta awoodda.

Dowladda Puntland waxay doonaysa in mashaariicda horumarineed in mar walba ay la socoto kor u qaadista awooda dawladda xaga farsamada iyadoo la hawlgalinayo khuburo dawladda ka caawisa xaga farsamda.Khabiirada hawshooda ugu muhiimsan waa gudbinta aqoonta iyagoo tababaraya shaqaalaha dawladda .Shaqalaysiinta iyo hawlgalinta khuburada waa in lala kaashado hay'adaha dawladda si loo hubiyo in ay

gudbiyaan aqoon iyo wax qabad waari kara, si kastaba ha ahaate waxaa lagu boorinaya bah-wadaagta horumarinta in ay mudnaanta koobaad siiyan shaqalaysiinta xirfadlayda dalka gudahiisa jooga.

2.6. Gargaar la saadalin karo.

Dawladda Puntland waxay doonaysa in la hergaliyo hab lagu saadalin karo gargaarka dalka soo galaya, si taas loo gaarana dawladdu waxay rajaynaysa in deeq –bixiyayaashu la wadaagan dawladda xogta deeqaha ay u qorsheeyeen Puntland, waxayna dawladdu rajaynaysa in deeq-bixiyayaashu ka dhabeeyaan deeqaha ay balan qaadan. Dawladdu sadaalinta gargaarka waxay uga gol leedahy in lagu daro hantida gargaar ahaanta lagu hibeeyo Puntland in lagu daro miisaaniyadda qaranka iyo in wax-qabadka gargaarka lagu muujiyo qorsheyaasha mudada dhexe ee horumarka dalka. Dawladda Puntland waxay ogsoontahay baahida marar qarkood loo qabo mashaaric biniadanimo oo mudo gaban soconaya si loogu gargaaro dadka ku waxyeelooba masiibooyin sida abaarah, ama dhibaatooyinka kale, hadaba masharicda biniadanimo lagama rabo in la sii saadalin karo, hasa yeeshe, waxaa lagu boorinayaa bah-wadaagta horumarinta ee fulinaya mashariic nooca biniadanimo ah in ay u dajiyaan qab isku xiraya gargaarka deg dega ah iyo horumarinta. Dawladda Puntland waxay u hawlgaliysa in la hagaajiyo nidaamka loo maamulo xogta gargaarka si hantida gargaar ahaanta dalka lagu hibeeyey loogu daro miisaniyada dawladda iyadoo la abuurayo jawi is-la xisaabtan iyo hufnaan ku dheehan tahay oo la wada aamini karo

2.7. Iskaashiga.

In la gaaro natiijooyin horumarneed waxay u baahan tahay iskaashi caafimaad qaba oo u dhexeeya dowladda iyo bah- wadaagta horumarinta,

iskaashiga noocan oo kale ah waa kuwa ugu waxtarka badan marka si buuxda loo isticmaalo xirfadaha dhammaan dhinacyada horumarinta sida iskaashiga labo –dhinac lah ee dhex mari kara dawladda iyo deeq bixiye ama dawladda iyo deeq-bixiyaal koox ah. Dhinac kale Dawladdu waxay iskaashi la yeelan doonta deeq bixiyaasha soo jireenka ah iyo kuwa dhawan ku soo biiray saaxada deeq-bixinta, Ururada caalamiga,shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo uruurada bulshada rayidka intaba. Dowladda waxaa ka go'an in la xoojiyo iskaashiga sida ku cad siyaasadan.

2.8. Nooc Gargaarka la doorbidayo.

Dowladda Puntland waxay quudaranaysa habab isku dhafan oo gargaarka lagu soo gaarsiiyo Puntland. Sharaxaadda soo socota waxaa lagu muujinaya habka ay dowladda Puntland u doorbidayso gargaarka.Dambiisha- dhaqaale: Puntland waxay doorbidaysa helitaanka gargaar horumarineed oo lagu taageero miisaniyadda dawladda ama in la kabo miisaniyada waaxyaha Dawladda.Maalgalinta horumar guud taas oo looga gol leeyahay in dawladdu si cadaalad ah ugu qaybiso degmooyinka dhaqaalah gargaarka iyo waliba in lagu maalgasho mashaaric dawladdu hogaaminayso oo lagu fulinayo qorshaha horumarineed ee qaranka iyadoo la isticmaalayo qorshaha shanta sano iyo xogta maamulka gargaarka.

Walaaca laga qabo lacagta tooska ah, lacagta tooska ah mar walba waa ilo maaliyadeed oo xoog badan oo ka baxsan nidaam xisaabeedka dawladda Puntland. Waxayna u muuqdaan in ay noqtay mid ka baxsan qorshaha iyo miisaaniyada dalka taas oo dawladdu ka walwalsantahay. Puntland iyo bah-wadaagta horumarinta ayaa si wadajir ah u samayn doona qaabka loo maamulayo dhaqaalaha faraha badan ee maraya nidaam ka baxsan hanaanka dawliga ah

2.9. Qiimaynta iyo Dabagalka.

WQIC waxay hadda diyarinaysaa siyaasadda Qiimaynta iyo Dabagalka (Q & D) iyo qalabka lasocodka. hadaba Dowladda Puntland waxay ku dhiirigalinaysaa hay'adaha horumarinta kala shaqeeya in ay u dhaqaaqaan isticmaalka nidaamka Q & D qaran, ee heerarka dhexe iyo kuwa degmooyinka, si la iskuwafajiyo qiimaynta, dabagalka iyo nidaamka warbixinta,

2.10. Nidaamka Maareynta Macluumaadka Gargaarka.

Dowladda Puntland ayaa qorshaynaysa in ay samyso habka isku gudbinta macluumaadka, Tani waa farsamo hagaajin doonta xog wadaaga u dhaxeeya bah-wadaagta horumarinta iyo Dawlada si loo sii hagaajiyo ku wada xiriirka, hufnaanta iyo isla xisaabtanka loogana fogaado soo celcelinta iyo isku noqnoqashada barnaamijyada mashaariicda.

Deeq-Bixiyayaasha waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay taageeraan nidaamkan si loo yareeyo dhaliilaha ka yimaada hal mashruuc oo soo noq noqoda ama hal meel laga wada fuliyo mashaariic isku wada mid ah iyo in loogu qaybiyo mashaariicda si siman dhamaan deegaanada Puntland taas oo dan u wada ah deeq-bixiyeyaasha iyo dawladaba. Si taas loo gaaro waxaa loo baahan yahay hawlaha ay ka mid yihiin ururinta xogta deeqaha oo laga soo uruursho deeq-bixiyaasha. Siyaasaddan waxay filaysa in Deeq bixiyayasha, fuliyayaasha , dowladda iyo bah-wadaagta kaleba isticmaalaan habka macluumaadka gargaarka xog kaydinta ee laga hirgalin doono WQIC.

CUTUBKA 3:

DHAQAN GALINTA SIYASADA IYO NIDAAMKA ISKU DUBARIDKA

3.1. Nidaamka isku dubaridka.

Si loo xaqijiyo in la mideeyo hawlgalada gargaarka loona yareeyo habacsanaan iyo isbarbaryaac dhumin kara waxtarka gargaarka dawladda Puntland waxay qaadaysa talabooyin lagu fulinayo siyaasada isku dubaridka gargaarka taas oo hoos ku xusan.

3.1.1 *Dawlada Puntland waxay taageeraysaa* dhisida iyo hawlgalinta wada shaqaynta qaybaha dawladda iyo bah- wadaagta hormarinta taas oo kor u qaadaysa wada shaqaynta iyadoo loo dhisayo koox hawleed hadba intii isku shaqo ah, koox-hawleed-yada waxaa hogaamin doona wasaaradaha ay khuseeyso iyo hadba ha'yada bah-wadaagta la ah.

3.1.2. *Dawladdu waxay asaasaysaa* madasha wada tashiga horumarka oo ay kuwada jiran gole wasiiro iyo masuuliyiinta ugu sareeysa ee bah-wadaagta horumarka.Madashu wadashiga waxay noqonaysa heerka ugu sareeya ee lagu falanqeeyo arimaha istratijiga ah ee horumarka iyo in lagu kala war qaato hadba meesha wax marayaan, hadaba Dawladdu waxay xoojinaysay madasha wada tashiga taas oo qaadan doonta door la talin iyo in ay dusha ka kala socoto sida horumarku u socodo.

3.1.3. *Madasha wada tashigu* waxay u shaqayn doonta hab madax banana taas oo si furan looga doodo isku dubaridka gargaarka yimaada Puntland iyo sidii hal jaho loogu hawlgalin lahaa iyadoo la waafajinayo qorshayaasha iyo mudnaanta dawladda. Maadashu waxay dusha kala

soconaysa hawlaha koox-hawleedyadu qabtan waxayna kala talinaysa golaha wasiirada hirgalinta iyo wax ka badalka ama baabinta siyaasada gargaarka Puntland.Madashau waxay kale oo la soconaysa hadba heerka uu marayo hirgalinta heshiisyada caalamiga ee kor u qaadida waxtarka gargaarka Dawladdu waxay abuuraysa jawi dhiirigalinaya in madashu ku shaqayso hab madax banaani si dib u eegis, kormeer iyo qaymayn loogu sameeyo wax-qabadka mashaariicda horumarineed ee ay fuliyaan bah-wadaagta horumarnita iyo dawladda.

3.1.4. *Wasarada qorshaynta* ayaa lahaanaysa hogaaminta, qoondaynta iyo kala mandaynta macaawinooyinka dibada ka yimaada iyadoo xaqiijinaysa in hantida gargaarka iyo hawl-galintiisaba lala mantaaneeyo qorshayaasha dawladda.

Sidoo kale Dawladdu waxay boorinaysa in wasaraddaha iyo ha'adaha kale ee dawladda ee wax ka fulinaya mashaariicda ay ka ciyaaran door muhiim ah si loo abuuro dareen lahaansho

3.2. Hirgalinta siyaasadan iyo caqabadaha la filayo.

Dawladda Puntland waxay ogtahay in ay soo wajihi karaan caqabado ka hor yimaada hirgalinta siyaasadan, si loo hirgaliyo siyasada gargaarka waxaa lagama marma'an ah in la helo rabitaan siyaasadeed oo xoog badan iyo hogaamin karti u leh hirgalinta siyasadaha iyo hawlgalinteeda. Sidoo kale waxaa loo baahan yahay wada shaqayn dhab ah oo dhex marta bah-wadaagta horumarinta iyo Dawladda Puntland isla markaasna awood ahaan loo diyaar garoobo fulinta talooyinka ay siyaasadan soo jeedinayso

3.2.1. *Dawladda Puntland iyo bah-wadaagta horumarintu* waa in ay ku heshiiyaan hab hawl fulineed kaas oo muujinaya sidii loo fulin lahaa kor u qaadista wax-tarka gargaarka iyadoo si gaara diirada loo saarayo

mataanaynta gargaarka iyo mudnaanta dawladda, abuurista dareen lahaansho iyo xoojinta hogaaminta dawladda.

3.2.2. *Waaxda isku dubaridka gargaarka Puntland* waxay diyaarinaysa hab lagu kormeero fulinta siyaasadan sidoo kale Waxaadu waxay la kaashan doonta bah-wadaagta horumarinta fulinta hirgalinta siyaasada isku dubarida gargaarka.

3.3. Masuuliyada Wasaraddaha.

Doorka wasaradaha iyo ha'yadaha kala duwan ee dawladdu ka ciyaaran abaabulka, wada xaajoodka iyo isku dubaridida gargaarka wuxuu ilaa hada ahaa mid isbarbaryaac ah. Kala daadsanaantaas waxay keentay in deeq–bixiyaasha iyo bah-wadaagta horumarintu ku wareeran cida ay tahay in lagala xariiro mashruuciida fulintooda. Isbarbaryaaca jira wuxuu kale oo wiiqay awooda hogaamineed ee wasaradda qorsheynta iyo xiriirka caalamiga ah oo shaqo ahaan waajib u leh isku dubaridada gargaarka dibada ka yimaada.Si looga baxo jaha wareerkaas, Wasaradda Qorsheynta ayaa qaadanaysa doorka la xaajoodka deeq-bixiyayaasha gar wada hadalada heer istratijiga ah si loo xaqiijiyo danaha heerka qaran. Wasaradda Qorsheyntu waxay iskaashi la samaynaysa wasaradaha iyo ha'yadaha kale iyadoo abaabulaysa kulamo iyo wadatashiyo xogta lagu wadaago isla markaasna si wada jir ah loogu gorfeeyo qorsheyaasha dawladda.

3.3.1. *Wasaraddaha iyo ha'yadaha kale ee dawladda* waa in ay darsan baahiyahooda iyagoo ku salaynaya qorshahooda istratijiga ah sidoo kalena wada xajood la bilaaban hadba bah-wadaagta horumarineed ee danaynaya in ay maalgaliso isla markaasna si wada jir ah loogu kuur galo sida fikrada mashruuco mira dhal u noqon karto. Wasarrada qorshayntu waxay

fuduudaynsa markii loo baahdo xiriirka iyo wada hadalka dhex maraya ha'yadaha dawladda iyo bah-wadaagta ay mashruuca kala xaajoonayaan.

Si kasaba ha ahaate masuuliyada in mashruucu mira dhal yahay waxaa iska leh wasarada ama ha'yada dawladda ee ka qayb qaadanaysa fulinta mashruuca.

3.3.2. *Wasaradda Qorsheyntu* waxay xalinaysa khilaafaadka isku qab-qabsiga la xariira cida xaqa u leh fulinta mashaariicda ee ka dhex aloosma wasaraddaha kala duwan. Wasaraddu waxay darsaysa nooca mashruuca la isku hayo iyadoo ku fiirinaysa hadba sidii ula xiriiro shaqada wasaradaha isku haya taaas oo lagu salayn doono go'aamada lagu kala saarayso qaybaha khilaafku dhexyaal.

3.3.3. *Wasaradda maaliyadu* waxay door muhiim ah ka qaadanaysa isku dubaridka gargaarka gar ahaan qondaynta dhaqaalaha lagu helo gargaarka kuna muujinaysa miisaaniyada dawladda, uruurinta iyo tax-liiqinta xogta dhaqdhaqaaqa gargaarka si loola mantaaneeyo qorshayaasha qaranka.

3.3.4. *Natiijada wada xaajoodka* waa in uu noqda mid ay ku qancaan wasarada qorshaynta iyo ha'yada dawliga ah ee fulinaysa mashruuca iyadoo si qoral ah loogu muujinayo heshiis isfaham(memorandum of understanding). Wasiirka qorsheynta/xiriirka caalamiga oo matalaya dawladda Puntland ayaa saxiixaya heshiiska isfaham madama ay masuuliyadiisa ka mid tahay xiriirinta heshiisyada caalamiga ah.

Xigasho

Accra Accord.

Afghanistan Aid Coordination Policy.

Iraq Aid Coordination Policy.

(2008). *Kosovo Aid Coordination Policy.*

National Planning and Development. Department of Coordination.

(2009). *Somaliland Aid Coordination Policy and Framework (1st draft).*

Uganda Aid Coordination Policy.

Rwanda Aid Coordination Policy.

Fragile States Aid Coordination.

Paris declaration on aid effectiveness. (March 2, 2005). Paris.

Rome declaration on aid Coordination. (February 25, 2003). Rome, Italy.

Government of Sierra Leone Aid Policy (2008)